

Adeegyada Manfacyada Nafaqada

Xubnaha Xaqa u leh ee haysta Oregon Health Plan (OHP) waxay caawinaad ka heli karaan iibsashada cuntada. Cuntooyinkan waxaa ka mid ah miraha iyo qudaarta darayga ah, iyo cunooyinka meel dhigma sida bariiska, baastada iyo cunooyinka gasacadaysan. Xubnaha waxay sidoo kale heli karaan in cunooyinka loo keeno ama kaarka loogu soo shubi si ay ugu isticmaalaan dukaamadaha ama suuqyada qudaarta iyo miraha ee qaarkood (farmers markets).



Taageerada nafaqada ee la heli karo:

- ▶ Miro iyo qudaar
- ▶ Waxbarashada nafaqada
- ▶ Cunooyinka meel dhigma
- ▶ Cunooyin caafimaadka loogu talagalay

Ma u qalmaa aniga?

Waxaa dhici karta inaad u qalanto haddii mid ka mid ah kuwan ay ku quseeyaan:

- ▶ Haddii aad haysato OHP
- ▶ Aad la tacaalayso xaaladdo nolosha wax wayn ka bedelaya
- ▶ Cunto aadan awoodin
- ▶ Aad uur leedahay
- ▶ Aad qabto xaalad caafimaad oo buuxisa shuruudaha manfaca
- ▶ Aad tahay qaangaar jira 19–26 oo qaba baahiyo gaar ah ee caafimaad
- ▶ Aad tahay 5 sano jir ama ka yar

CareOregon ayaa kula soo socodsiin doonta waxa aad u qalanto goorta aad buuxiso ama codsato.

Side ayaan u cudsadaa kaalmada nafaqada?



Haddii aad buuxiso shuruudaha kor ku qoran, iskaangaree koodka QR si aad u buuxiso **Social Needs Request Form** Sidoo kale waxaad soo wici kartaa **CareOregon adeegga macaamiilka oo ah 503-416-4100 ama iimeel ku soo dir hrsncx@careoregon.org**

Dokumentigan waxaad ku heli kartaa isagoo luqaddo kale ku qoran, far waawayn ku qoran, farta bariil ama qaab kale loo qoray haddii aad doorbidayso. Sidoo kale waxaad xaq u leedahay turjumaan inaad hesho. Waxaad caawimaad ka heli kartaa turjumaan caafimaad oo xirfad leh ama u qalma. Kaalmadan waa mid bilaash ah. Wac 800-224-4840, TTY 711, ama u sheeg daryeel bixiyahaaga. Waxaan aqbalnaa wicitaanada gudbinta.